La-falgalka Dadweynaha ee Listen and Learn:

Kulanka Barbar-socda Kal-fadhiga

Tilmaamaha

Kulankan barbar socda kal-fadhiga, waxaanu sahmin doonaa micnaha ardaydeena ee ku aadan gaadhitaanka guul waxbarasho iyo sida aan uga taageeri karno fursadaha ka caawinayo inay halkaas gaaraan.

Qol kastaa waxa uu yeelan doonaa fududeeye iyo qoraal-xusuus qore si uu u qoro qodobbada muhiimka ah iyo mawduucyada ugu muhiimsan ee doodahiina - shirarkan lama duubayo, laakiin xusuus-qoridu waxay muhiim u tahay awoodda Hay'adda inay ku soo darto mawduucyada guud ee ka soo baxaan doodahaan qorsheynta iyo shaqada mustaqbalka. Fududeeyaha ayaa ku hogaamin doona kooxihiina su'aalo taxane ah si uu sahmin ugu sameeyo fikradahiina ku saabsan guusha iyo fursadaha ardayga, iyo sida degmooyinka, bulshooyinka, iyo Gobolka ay uga wada shaqayn lahaayeen taageerada nooca fursadaha aan rabno in aan ku aragno dugsiyada.

Fadlan ogsoonaw: Waxaan aqoonsannahay in waxbarashadu ay tahay aag kor u qaadi karta dareemo iyo fikrado xooggan kuwaasna waxeey leeyihiin wada hadallo adag oo ka dhasha dooda dadka. Wada sheekaysigayaga fiidkan waxa uu diiradda saari doonaa qeexida guusha ardaydeena iyo sidii ay Wakaalada Waxbarashadu u taageeri lahayd dugsiyada si loo hubiyo in arday kastaa helo fursado waxbarasho oo tayo sare leh.

Waxaan ka codsaneynaa kuwa maanta jooga inay ixtiraamaan kala duwanaanshaha fikradaha midba midka kale oo ay qiraan in qof kasta oo halkan jooga caawa uu fiidkan u yimid sabab ah iney raadinayaan inay taageeraan isbeddel wanaagsan.

Su'aalaha Dooda Kulan Kooxeedka Barbar-socda Kal-fadhiga

Guusha Ardeyga

1. Markaad ogaato in ardaygu guulaystay, maxay taasi ugu egtahay heerarka kala duwan ee waxbarashada, oo ay ku jiraan:
    a. Dugsiga hoose?

    b. Dugsiga dhexe?

    c. Kadib Dugsiga dhexe?

2. Markaad ka fikirto guulahan, xogtee ama macluumaadkee ayaad ku tiirsan tahay si aad u cabbirto guusha:
    a. Ardeygaaga?

    b. Dugsigaaga?

    c. Ardeyda Vermont, si guud ahaanba?

Taageerooyinka iyo Waayo'aragnimada Ardeyga

3. Sidee bay dugsiyadaagu ugu taageeraan ardayda si ay u guulaystaan? (tusaale ahaan, waxbarashada dibadda, barashada shucuurta bulshada, taageerooyinka dhinaca tacliinta, iwm.)

4. Ma jiraan agabyo kale oo aad jeclaan lahayd inaad u aragto ardayda aan hadda la heli karin?

5. Ma jirtaa heerka ugu yar ee fursadaha waxbarasho ama khibradaha aad u malaynayso inay heli karaan dhammaan ardayda, iyadoon loo eegin dugsiga ay dhigtaan?

6. Ma u malaynaysaa inay ka jiraan caqabado ku gidaaran bixinta fursadan ugu yar goobaha qaarkood?

Miisaaniyadda

7. Nidaamyada dugsiyada ee gobolka oo dhan ayaa wajahaya hoos u dhac ku yimid diiwaangelinta ardayda. Tani miyay run ka tahay nidaamkaaga oo haddeyna sidaas tahayna, maxaa saamayn ah oo aad aragtay?

8. Dugsiyada qaar ee gobolka ayaa isdiiwaangelintoodu yar tahay taasoo ka dhigi karta inay kharash badan ku baxaan socodsiinta oo ay adag tahay inay ardayda siiyaan fursado waxbarasho oo si buuxda u kala duwan. Si kastaba ha ahaatee, goobahan waxbarasho ayaa inta badan muhiim u ah bulshada iyo qoysaska. Sidee bay Vermont isugu dheelitiri kartaa goobaha yaryar iyo baahida fursadaha waxbarasho ee ardayda?

9. Vermont waa gobol qiimeeya madax banaanida iyo gacan ku haynta deegaanka marka ay timaado waxbarashada, laakiin waxaa laga yaabaa inay jiraan faa'iidooyin marka la wada shaqeenayo. Waa maxay waxyaalaha aad doonayso inaad wadaagto si ardayda iyo dugsiyaduba ugu helaan fursado badan iyagoo adeegsanayaan kharash ah mid waara?